**AMARKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 3 Abriile 1972, Lr. 99. Nidaamka Xuquuqda Notaayaha.**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

MARKUU ARKAY Xaashida Kowaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY qodobbada 2 iyo 4 ee Sharciga 11 Maarso 1972 ee Lr.19;
AYADOO UU SOO JEEDIYEY Xoghayha Dawladda ee Garsoorka (Caddaaladda) iyo Arrimaha Diinta;

**WUXUU SOO SAARAYAA XEERKAN:**

**Qod. 1**

Waxaa la ansixiyey liiska qiimaha (sicirka) xuquuqda notaayaha ee ku lifaaqan Xeerkan.

**Qod. 2**

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa isla maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 3 Abriile 1972.

GUDDOOMIYAHA
Golaha Sare ee Kacaanka
**S/Gaas Maxamed Siyaad Barre**

XOGHAYA DAWLADDA
ee Garsoorka iyo Arrimaha Diinta
**Prof. Cabdiqani Sheekh Axmed**

XOGHAYA DAWLADDA
ee Maaliyadda
**Maxamed Yusuf Weyrax**

**SICIRKA XUQUUQDA NOTAAYAHA**

**Qod. 1**

Qoraallada macaamilaadka oo ay sameeyaan saraakiisha notaayayaasha ah, sida ku qeexan qodobka Sharciga 3 Abriile 1972, ee Lr. 99, waxaa ka waajibaya xuquuqda soo socota:

1) xaq góan ee ka waajibaya sameynta qoraallada macaamalooyinka, oo marka la eego dabeecaddooda, aan lahayn qiime lacageed;
2) xaq looga cabbir-qaato qiimaha dulucda macaamalada;
3) xaq ku saleysan tirada saacad, ee ay qaadaneyso diyaarinta qoraalka macaamala;
4) xaq ku saleysan tirade nuqullada, caddeymaha, minguuriyannada, qorriinnada iyo diiwaangelinta qoraallada macaamalooyinka.

## XAQ GO'AN

### Qod. 2

Xuquuqda ku xusan lr. 1) ee qodobka la soo dhaafay waxaa loo gooyey sida soo socota:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| a) | — awakaalad Guud . . . . . . | Sh. | So. | 90,00 |
| b) | — Wakaalad Gaar ah . . . . . | » | » | 60,00 |
| c) | — Keydinta qoraallada macaamalooyinka iyo qoraallada xogwarranka. . . . . . . . | » | » | 70,00 |
| d) | — Keydinta qoraalka dardaaranka sirta ah . . . | » | » | 100,00 |
| e) | — Keydinta qoraalka dardaaranka ee uu dardaarmaha gacantiisa ku qoray. . . . . . . | » | » | 130,00 |
| f) | — Keydinta qoraallada kale ee sí cad loo cayimin. . | » | » | 70,00 |

## XAQA LOOGA CABBIR-QAATO QIIMAHA KU CILLAN QORAALKA

### Qod. 3

Ashtako kasta ee ku saabsan kambiyaale la bixin waaye iyo xaashi lagu amraayo bixin lacag ama badeeco waxaa ku waajiba (laga rabaa):

| | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Ilaa | Sh. | So. | 100 | . | . | . | . . | Sh. | So. | 5,00 |
| Ka badan | » | » | 100 | ilaa | Sh. | So. | 1.000 | » | » | 10,00 |
| » | » | » | 1.000 | » | » | » | 5.000 | » | » | 15,00 |
| » | » | » | 5.000 | » | » | » | 10.000 | » | » | 20,00 |
| » | » | » | 10.000 | » | » | » | 20.000 | » | » | 30,00 |
| » | » | » | 20.000 | » | » | » | 50.000 | » | » | 50,00 |
| » | » | » | 50.000 | » | » | » | | » | » | 0,00 |

Dhigaalka lacagta iyo shaabbadaha qiimeysan waxaa (ku góeysa) laga qaadaa khidmad (xusmad) u dhiganta kunkiiba toban ee qiimaha.

### Qod. 4

Xagga qoraallada macaamalaadka, iyo heshiisyada ku saabsan wareejinta hanti maguurto ah, heshiisyada ku saabsan shirkadaha nooc kasta iyo heshiisyo ku saabsan wada lahaansho hanti ka dhexeysa nin iyo xaaskiisa, qiimaha waxayaabaha lagu darsaday shirkad ama laga dhigay hanta laga dhigay wax ka dhexeysa nin iyo xaaskiis, heshiisyada mideynta shirkadaha, lagu yeelanayo qiimaha wadareed ee raasumaalka iyo keydka shirkadda shirkad mid kala lagu dheehayo/dhex milay; dood-qoraalka (maxdarka) ee shirweyne shirkadeed ku saabsan kordhin raasumaal iyo soo saari warqado maalgashi, wadarta lacagta kororka iyo maalgashiga, qoraallada ku saabsan wax qaybsi, ku dul góda qiimaha dulucda qoraallada macaamalada, unkid heshiis xaq manfaceysi shey, xaq isticmaal iyo dhul, dhul kale adeeg loo soo marinayo, heshiis ku saabsan rahan hanta maguurto ah, is-dhaafsi laba shey, qoraallada ku saabsan wixii iib ah oo ay fuliyaan maxkamadaha ee tacbasho iyo mamfaceysi dhul cid kale leedahay, iyo qoraallada kale iyo heshiisyada leh duluc isticmaal iyo manfaceysi xuquuq haysasho ee qoraallo damaanadeed waxaa ku góaya:

| | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| a) | — | Ilaa | | | Sh. | So. | 10.000 — | Sh. | So. | 4% |
| b) | — | Min | 10.000 | ilaa | » | » | 25.000 — | » | » | 2,5% |
| c) | — | » | 25.001 | ilaa | » | » | 50.000 — | » | » | 2% |
| d) | — | » | 50.001 | ilaa | » | » | 100.000— | » | » | 1% |
| e) | — | » | 100.001 | ilaa | » | » | 500.000 — | » | » | 0,50% |
| f) | — | Ka badan 500.000 | | | | | — | » | » | 0,20% |

**Qod. 5**

Khidmadda isu–dhignaanta oo lagu gooyey/qarriray qodobka 4, ee la soo dhaafay, waxaa bar laga dhimay:

a) — xagga wareejinta hanti maguurto ah iyo hantida guurtada ah ee diiwaangashan (baabuurta,maraakiibta iyo diyaaradaha);
b) — xagga amaahda/amaahaha muddada dheer, qoraallada risiidada ah iyo kala bax, oggolaansho la kala wareegid, dhimid iyo tirtiridda rahanta maguurta ah;
c) — agga heshiisyada kirada, daabulidda iyo kirada gaadiidka guud ahaan;
d) — xagga qoraallada unkidda/dhisidda oo sí kasta la xiriira hawlqabadka shirkadaha iskaashatooyinka guud ahaan.

**Qod. 6**

Xagga qoraallada macaamalada isdhaafsiga laba shey, khidmada isku qiyaaska ku saleysan waxa lagu bixinayaa qaybta ashyaáda la isdhaafsaday ee ugu qiimaha weyn.
Wareejinta ku saabsan hanti kooban maguurto ah iyo mid leh dabeecad guurto, waxaa lagu dabbaqayaa boqolleyda u gaarka ah nooc kasta oo ka mida hantida.

**Qod. 7**

Marka ay jiraan xaalado aan sí gaar ah loogu tilmaamin qodobbada horey loo soo dhaafay, khidmadaha la qaadanaayo waxaa la dejinaya, ayada oo laga qiyaas-qaadanayo xaalaaha la midka ah.

**KHIDMAD SAACAD KU GO’AN**

**Qod. 8**

Xagga qoraal doodeedyada (maxdarrada) la xiriira tirakoobyada xisaabaha, qaybaha, iibka xaraashka maxkamadeed (iibka garsooreed), furitaanka iyo shaacinta qoraallada dardaaranka sirta ah, khidmada laga rabo waa Sh. So. 60/- (lixdan) labada saac ee ugu horreeya waa khidmada waa Sh. So. 25/- (shan iyo labaatan) saacad waliba oo xigta; sí kastaba, isku darka lacagta oo dhan kama badan karto wadarta ah Sh. So. 200/- (lababoqol) maalintii.

**KHIDMADA KU GÓAYSA NUQULLADA, KHULAASADAHA, SHAHAADOOYINKA, FAALLOOYINKA GAA-GAABAN OO LAGU QORO DIIWAANKA IYO GALEYNTA QORAALLADA.**

**Qod. 9**

Xagga bixinta nuqullada iyo bixinta caddeynta kasta ee qoraallada macaamillooyinka uu notaayuhu ansixiyo waxaa laga rabaa khidmad goán oo ah Sh. So. 10/- (toban).

Xuquuqda ay qeexeen qodobbada la soo dhaafay ka sokow, waxaa ku goáya xuquuqda qoritaanka oo u sargoán sida soo socota:

a) Ka-qayla-keenidda kambiyalaha: Sh. So. 5/- (shan);
b) Qoraallada kale: Sh.So. 20/- (labaatan) xaashi kasta oo ka mida xaashiyaha qoraalku ka kooban yahay.

**Qod. 10**

Sarkaalka Dawladda oo ah notaayaha waxa uu xaq u leeyahay in loo celiyo wixii kharash ah ee kaga baxay galeynta iyo faallo ku qorista Diiwaanka notaayaha, qoraallada uu ansixiyey, taas oo u sargoán sida soo socota:

a) Kharashka galeynta: Sh.So. 3,50/- saddex iyo bar;
b) Faallo ku qorista Diwaanka notaayada.

**Qod. 11**

Xuquuqda (khidmada) ku xusan Xeerkan waxaa qaadaya sarkaal oo uu Xoghayaha Dawladda, ee Maaliyadda, u magacaabay muhimaddaas.

Ilaa laga soo saarayo magacaabiddaas, xuquuqd la soo sheegay waa in loo shubaa Xafiiska Canshuuraha iyo Ganacsiga, kaas oo bixin doona rasiid.